# BELONG. BELIEVE. BECOME.

**Ardayda iyo qoysaska qaaliga ah ee Edison,**

Aad ayaan ugu faraxsanahay inaan ku soo dhaweyno ardaydeena cusub iyo kuwa soo laabanaya sanad dugsiyeedka 2021-22 ee Dugsiga Sare ee Thomas Edison! Fadlan waqti sii si aad u akhrido warsidaha iskuulka ee ku saabsan warbixinada dib furida iskuulka-waxaa ku jira taariikho iyo macluumaad muhiim u ah dhammaan ardayda iyo qoysaska.

### *Maalinta Kowaad ee Iskuulka Ardayda Fasalada 10-12aad waxay imanayaan goordanbe*

Si aan u soo dhawayno ardayda fasalka 9aad ee bilaabaysa Edison, ardayda fasalada 10aad-12aad waxay iman doonaa 10ka subaxnimo Arbacada, Sebtember 8keeda. Ardayda fasalka 9aad waa inay yimaadaan si ay si dhaqso ah u bilaabaan 8:15 subaxnimo maalintaas.

### *Caafimaadka iyo Badbaadada*

Dhammaan ardayda iyo shaqaalaha, hadii ay talaalanyihiin iyo hadii kalaba waxaa laga rabaa inay xirtaan af-saabka( facemask) marka ay ku joogaan dhismaha iskuulka. Fadlan hubso in ilmahaagu la yimaado iskuulka af-saabyo( facemask) badan oo nadiif ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan hab raaca badbaadada MPS COVID, booqo mpls.k12.mn.us/covid_safety.

### *Kaanbuyuutarka Chromebooks-ga ee Iskuulka*

Ardaydu waa inay maalin walba keenaan Kaambuyuutraka Chromebook- ga iskuulkooda. Haddii ilmahaagu aanu haysan kombiyuutar, mid ayaa la siin doonaa (kuma talineyno in qalab shakhsi loo leeyahay la keeno iskuulka).

### *Jadwalka Cusub*

Edison waxaan samaynay jadwal cusub oo fasalada ah! Jadwalkaan cusub wuxuu na siinayaa fursad aanu si qoto dheerno wax u barno ardaydeena, siinano 1: 1 taageero dheeraad ah ardayda. Waxa kale oo loola jeedaa jidwalkan cusub inaan yareeno samaxada ardayda mararka ay fasalada kala galeyaan iyo xiliyada qadada ay aadayaan.Ka fiiri jadwalka cusub websaydkeena (edison.mpls.k12.mn.us). Saacadaha iskuulka waxaa weeye 8:15 subaxnimo 3 galabnimo.

### *Ardayda oo Baananka Wax Ka soo Cuna aadana Waxbarasho Baanaanka oo Iskuulka ka Baxasan*

Helida hawo nadiif ah oo banaanka ah waxay lama huraan u tahay caafimaadka jirka iyo maskaxda! Ardaydu waxay Qadada ku cuni karaan bannaanka Athletic Plaza, hadii ay cimilada fiican tahay. Haddii aad jeclaan lahayd inaad oggolaanshahaaga siiso ilmahaaga si uu garoonka iskuulka ugu qadeeyo ama wax ugu barto banaanka, fadlan saxeex oo soo celi foomamka ku lifaaqan warqadan. Xusuusnow: ardayda fasalka 9aad looma ogala inay banaanka ku qadeeyaan banaanka iskuulka ilaa iyo asbuuca 2 -da toddobaad ee ugu horreeya.Waxaan rajaynaynaa sanad wanaagsan oo waxbarasho wanaagsan iyo jaceyl ah ee Dugsiga Sare ee Edison. Haddii aad qabto wax su'aal, fadlan naga soo wac 612-668-1300.

*Principal Eryn Warne & the EHS Staff*

**Taariikhaha Muhiimka ah**

**Shirka Dib Ugu Soo Noqoshada Iskuulka & Kaararka Baska**
Khamiis, September 2da
- **Kaararka Baska** (Gym) 1:30-7Galabnimo
- Shirka soo noqoshada 4-6galabnimo

**Xaflada Eastside & Ciyaaraha**
Jimce, September 3da
- Cunto & Waxyaabo kale: 5 galabnimo
- Furitaanka 6 Gabalnimo

**Maalinta uu iskuulku furmayo**
Arbaco, September 8da
- Fasalka 9aad waxa uu bilaamayaa at 8:15subaxnimo
- Fasalada 10aad-12aad 10am

**Wakhtiga Caadiga ah ee Iskuulka**
- Waxaa la furayaa 7:45subaxnimo
- Fasalada waxay bilaamayaan 8:15 subaxnimo
- Waxa uu dhamaanayaa 3 galabnmo

**Maalinta Sawirada La Galo**
- Jimce September 17da

**Bandhiga Waxbarasho**
- Jimce, September 10da

**Ciyaaraha Iskuulka Lugu Qabanayo**
- Furitaanka: 9/24
- Toddobaadka Ruuxa: 9/27-10/1
- Shirar 9/29
- Kubbadda laliska: 9/27 & 9/30
- Kubadda Cagta Wiilasha:9/28 & 9/30
- Kubadda Cagta Gabdhaha: 9/30
- Tennis -ka Gabdhaha:9/28
- Pep Fest: 10/1
- Ciyaarta Kubadda Cagta: 10/1, 6pm
- Qoob -ka -ciyaarka : 10/2, 6pm

**Shirarka Macallinka Waalidka**
- Oktoobar 19, Fiidkii
- Oktoobar 20, Maalinta

**Shirarka Macalimiinta Gobolka**
- Oktoobar 20-22

**Dhammaadka Faylka 1**
- Toddobaadka Noofambar 1

**Fasaxa Dhammaadka Faylka 1**
- Jimce, Noofembar 5

# PARENT INVOLVEMENT

**Gudiga Waxqabadka ee Edison (EAC)**

Eeg warqadan ku lifaaqan tan si aaad u ogaato EAC.

**Gudiga Iskuulka**

Gudiga Dugsiga Sare ee Edison waa koox daneeyayaal oo kala duwan oo la shaqeeya maamulaha kalna taliya arrimaha mihiimka u ah dugsiga iyo bulshada. Waxaan gacan ka geysannaa inaan u jihayno jiho wanaagsan dugsiga Edison, annagoo kula xisaabtameyna dugsiga ballanqaadyadiisa, una codayno arrimaha mihiimka sida miisaaniyadda iyo barnaamijyo . Waxaan hadda raadinaynaa dad a kala duwan oo nugu soo biira oo ka kooba qoyska iyo bulshada kalaba. Haddii aad xiisaynayso inaad nagu soo biirto, la xiriir Maamulaha Warne
eryn.warne@mpls.k12.mn.us.

## ATTENDANCE

**Ogow xaqiiqooyinka ku saabsan saameynta ay leedahay in la yimaado fasalada iyo guusha ay leedahay oo ku xiran inaad w qalin -jabiso wakhtigii luguugu talagalay.**

**-Ardayda maqnaada laba maalmood ama ka badan iskuulka bishiiba (cudurdaar ama cudurdaar la'aan) waxaa loo tixgeliyaa " inuu si joogto ah u maqan yahay".**

**-Ardayda maqnaanshaha badan waxay la kulmaan halis aad u badan oo ah inaysan ka qalin -jabin Dugsiga Sare.**

**-Ardayda oo 10 daqiiqo oo kaliya ka soo daaha iskuulka maalin kasta waxay seegaan wax u dhigma 6 maalmood oo dugsi ah, taas oo saamayn ku yeelanaysa fursaddoodii qalin -jabinta xiligii loogu tagalay .**

**Iskuulka imow maalin kasta xiligii loogu tahalgalay**

## Ciyaaraha iyo waxyaabo kale

**Xafiiska ciyaaraha, Rm. 101, 612-668-1344**

**Beacons, Rm 100A, 612-788-4881**

Waxaad ka hel kartaa jadwalka xayaysiisyada Naadiyada Edison, Waxqabadyada, Helitaanka Kulliyado iyo Ciyaaraha Fudud, Warbixinta Macluumaadka ,Sebtembar 10 -da, kaalay oo is qor!!

Waa Wax Wanaagsan inaad Ogaato!

**Telafoonka Xafiiska Iskuulka**: 612-668-1300
**Telafoonka Imaanshaha ardayda**: 612-668-1311
**Soomaali:** 612-668-1300

**Cuntada**

Quraacda iyo qadada waa u bilaash dhammaan ardayda Edison iyadoon loo eegin u -qalmitaanka. Waxaan ka codsaneynaa in dhammaan qoysaska ay buuxiyaan foomkaCuntada; foomka la buuxiyay ayaa faa'ido u ah in la siiyo maalgelin lacageed dugsiga sida qoysaskeena ku baahan in laga bixiyo kharashka (imtixaanka ACT, arjiga kulliyadda iyo ka -dhaafitaanka khidmadda Ciyaaraha). Waxaad Ka hel kartaa foomka shirka dib-u furida iskuulka ama family.titank12.com

**Agabka Dugsiga**

Waxaad ka ogaan doontaa waxa aad ugu baahan tahay shirka dib ugu soo noqoshada iyo inta lagu jiro usbuuca koowaad. Qorsheyso inaad soo qaadat qalin qoro, buug yar iyo gal aad warqadaha gashato toddobaadka ugu horreeya. Boorsona waa ku talinayaa.

**Buugyaraha Ardayda**

Wax Ka ogow Xeerka Lebiska dharka, Qiimeynta ardayda iyo imtixaanaadka iyo habraacyada kale adigoo dib u eegaya Buug -yaraha Ardayga, ka eeg bogga internetka Edison: edison.mpls.k12.mn.us

**Kaarka Baska**

Xeerarka kaarka baska ayaa xoogaa isbeddelay sannadkan. Ogow haddii aad u -qalantid kaarka baska halkan **ccr.mpls.k12.mn.us/go-to**.

**Fasalada aad ku Dhacday Sidii aad u guulaysan lahayd**

Diyaar ma u tahay inaad qalinjabiso? Haddii aad ku dhacday hal ama afar meelood meel maadooyinka lagaaga baahan yahay, waxaan bixinaynaa fasalo aad qaadan karto inta aad joogt dugsiga maalinimadii ama marka dugsiga dhamaado . La xiriir la -taliyahaaga wixii macluumaad dheeraad ah.